



MAAMULKA GOBALKA BANAADIR

Xayeesiis hor-dhac ah oo ku saabsan wax ka ogaanshaha suuqa

Ujeedo: Casumaad ka soo qeybgal iyo latashi- hordhac u ah Dhismaha Biyo Mareeynka Weyn ee Xamar oo qandaraaskiisa soo socdo

Mudane/Marwo:

Maamulka Gobalka Banaadir waxaa sharaf weyn u ah in aad kala soo qeyb gashid shir wada tashi iyo diyaar garaaw, shirkaasi oo horudhac u ah qandaraaska sumaddiisu tahay **O-16 (Line L2), Package 1 ee Biyo Mareeynka Muqdisho ee soo socda**, kaasi oo dhawaan la soo xayeeysiin doono. Mashruucaan waxaa uu ka mid yahay barnaamijka **(Somalia Infrastructure Development For Access and Jobs, Phase 1 Project using Muti-phase Programmatic Approach)**

Hadaba, iyada oo laga duulayo daah-furnaanta mashruuca, ayuu Maamulka G/Banaadir casuumaadan la-tashi iyo isxog-wareysi u fidiyay daneeyayaasha mashruuca si ay u helaan macluumaad la xiriira howlaha Biyo Mareenka weyn ee Muqdisho kaasi oo qandaraaskiisu goor dhaw la soo baahindoono.

Fahamka awoodda Suuqa ka jirto

Ujeedada shirka ayaa ah in xog laga helo awoodda waxqabad ee suuqa ka jirto, gaar ahaan shirkadaha awoodda u leh fulin mashruuc noocan oo kale ah iyada oo shirkadaha lala wadaagayo macluumaadka mashruucan oo mar dhaw qandaraaskiisa la soo xayeeysiin doono.

Shirka waxaa loogu tala galay in:

- In Shirkadaha warbixin guud laga siiyo mashruucan.
- In shirkadaha lala wadaago caqabadaha iyo culeysyada farsamo ee ka imaan karo mashruuca.
- In shirkadaha daneenaya la soo tusiyo goobaha shaqada laga fullinayo, kadibna laga dhageysto aragtidooda iyo waayo aragnimadooda, loogana jawaabo su'aalaha ay qabaan.
- In meel sare la gaarsiiyo wacyigalinta iyo hadal heynta mashruuca
- In wax badan laga ogaado awoodda waxqabad ee suuqa ka jirto

Baaxadda iyo Dulucda shaqada Mashruuca

Mashruucaan wuxuu ka kooban yahay hawlo badan (Fiiri lifaaqa luqadda Ingiriiska ku qoron), howlahaasi oo ay kamid yihiin dhismo Dhuun Weyn oo qaado biyaha roobka oo dhirirkeeda gaaraya 3kilomitir ,wuxuuna dhex marayaa waddooyinka laamiga ah ee Magaalada Muqdisho. Shaqada waxay u baahnaan doontaa adeegyada farsamo ee kala ah: tiirar yaryar oo dhulka lagu xoojiyo, **tiirar qaabka xaashida leh oo biro ka sameysan oo dhulka lagu dhajiyay, Tiirar aas-aaseed qodid wareeg ah**, (micropiles, sheet piles, CFA piles, and shoring systems). Shaqada la qabanayo waxaa kale oo kamid ah faagid iyo qodid laga fullinayo carro bacaad ah oo jilacsan, carro buuxin, ilo biyo maareen, diyaarin sanduuqyo shub ah (box culverts), hawlo dib u hagaajin adeegyada waxyeelada soo gaarto inta dhismaha lagu guda jiro , isku xirka dhuunta biyaha qaadda ee cusub, biyo qabadka KM4 , dhuunta biyaha badda geyneyso (Indian Ocean), iyo sidoo kale dib u hagaajin laamiyada howshaan saameeysay ayaa ka mid ah howlaha la qabanayo.

Hawlaha kale ee farsamo iyo macluumaad dheeri ah ka fiirso lifaaqa afka Ingiriiska ku qoron ee la socdo warbixintaan.

Waxaa muhiim ah in shirkadaha ka soo qeyb galayo qandaraaskaan in ay muujiyaan khibrada ay u leeyihiin qodista godad waaweyn oo hoos loo qadayo lagana faagayo goob leh carro jilicsan, adeegsiga nidaamyada carro dumid celinta, CFA iyo taakeeyn, adeegsiga lamiyeeriga derbiyada godadka loo adeegsado dhismaha shaqooyinka badda ee xeebta agteeda ah, iyo shaqooyinka badda dhexdeeda laga fuliyo.

Muddada dhismaha waxaa la filayaa inay noqoto qiyaastii 38 bilood.

Mashruucaan waxaa la filayaa in lagu maamulo nidaamka u deggasan Bankiga Adduunka ee (RFB), sida ku xusan Xeerka Qandaraasyada Bankiga.

1. Waqtiga ka qeybgalka shirka

- **Taariikh: 1st June 2026**
- **Waqtiga: 11:00 subaxnimo – 3:00 galabnimo** xilliga Muqdisho.
- **Goobta:** Madal khadka tooska ah (Virtual platform)
- **Qaabka:** Soo bandhigid iyo dood qadka ah oo toos ah

1. Ka Qaybgalkaaga

Waxaan si xushmad ku dheehan tahay mar kale kaaga codsaneynaa in iyada oo laguugu casumay arrinka aan sare ku soo sheegnay in shirkaddaada nagala soo qeyb gasho shirkan muhiimka ah.

Ogoow aragtidiinna iyo jawaab celintiinu qiimo weyn ayeey noogu fadhisaa, waxayna xoojineysa nidaamka qandaraas bixinta ee aan ku hawlanahay

Fadlan ku soo jawaab celi ka-qaybgalkaaga ugu dambeeyn **31st May 2026, saacadda 12:00 duhurnimo** adigoo oo email u soo diraya cinwaanka hoos ku xusan: procurementbra1@gmail.com

Ruuxa lagala Xiriirayo waa : Mohamed Abdisatar, Madaxa libka iyo Qandaraasyada Mashruuca.

1. Xusuusin Muhiim ah

Ujeeddada casumaaddaan waa la tashi suuqa oo keliya, ee ma ahan qandaraas rasmi ah ama nidaamka xulashada.

Ka soo qaybgalkaaga hawshan kuma heli doontid wax darajo ama dhibco go'aan ah oo ku saabsan habka qandaraas bixinta soo socda.

Waxaan sugaynaa ka soo qaybgalkaaga iyo kaalinta qiimaha leh ee aad ka qaada doontid hawshaan.

Mahadsanidiin